Cusboonaysiinta Qaynuunka Early Achievers
Maarso 2017

Isbeddelka ERS ee Shayga la Xidhiidha Buugaagta iyo Sawirada

Laga bilaabo Maarso 16, 2017, Early Achievers waxaa laga saari doonaa dhammaan qalabka ERS shay la xidhiidha Buugaagta iyo Sawirada. Xog uruuriyayaashu waxay calaamayn doonaan shayga aan ku quseeyn inta lagu jiro qiimaynta goobta. Isbeddelkan ma saamayn doonto dhibcaha guud ee kaqaybgalayaasha.

Waaxda Waxbarashada Hore (DEL) ayaa aaminsan in qiimaha helitaanka noocyo kala duwan oo qalabka akhriska oo ka tarjumaya waayaha iyo dhaqamada carruurta iyo qoysaskooda ay ka faa'iido badan yihiin wixii laga heli lahaa isticmaalka tilmaamayaashan habka darajeynta.

DEL waxay aqoonsan tahay in helitaanka buugaagtu ay door muhiim ah uga jiraan waxbarashada iyo horumarka hore. Si ay uga caawiyaan qoysaska iyo xirfadlayaasha waxbarashada hore si ay u siiyaan noocyo kala duwan oo buugaag hodan ah, ayaa DEL waxay shuraako la sameystay maktabadaha guud ee gobolka. Ujeedadayadu waa inaanu siinno tallooyin khabiir ku ah xulashada buugaagta degaanka waxbarashada hore iyo sidoo kale agabyo dheeraad ah iyo dhacdooyinka carruurta, qoysaska iyo bixiyeyaasha waxbarashada hore. Si wadajir ah, waxaan uga wada shaqaynaynaa si loo hubiyo in ilmo kasta oo Washington uu helo fursado uu ku hormariyo jacaylka uu u qabo luqadda iyo akhriska.

Xubnaha Guddi Hoosaadka Dibu eegidda Early Achievers Shaqaale aya Qaadanayaan

Guddiga Hoosaadka Dibu eegida Early Achievers (EARS) ayaa hadda aqbalay codsiyada waalidiinta iyo bixiyayaasha. Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan booqo del.wa.gov/earlyachievers

Codsiyada Heerka 2 iyo Shatiyada Bilowga: Cusboonaysiinta Qaynuunka

Kaqaybgalayaasha haatan ku jirto shatiga bilowga ah waxay hadda heli karaan in la ansixiyo codsiyadooda Heerka 2. Isbeddelkan wuxuu u ogolaanayaa bixiyeyaasha cusub inay sii wadaan aqbalitaanka kaalmada inta ay ka sii shaqeynayaan helitaanka shatigooda aan dhicin. Bixiyeyaasha waa in ay haystaan shatiga aan dhacayn oo heer wanaagsan ah si ay u soo codsadaan qiimaynta goobta.

WASHINGTON EARLY ACHIEVERS
PREPARING CHILDREN FOR SUCCESS IN SCHOOL

Fududeynta Habka Gaaritaanka Qiimeynta Heerka 3

Dhammaan bixiyeyaasha kaqaybgalayaasha ee soo codsanaya qiimeynta goobta wixii ka dambeeya Abriil 1, 2017 oo ururinta xogta bilaaba Julaay 16, 2017 ama kaddib waxay ku gaari karaan darajeeynta Heerka 3 iyagoo soo buuxinaya dhibcaha ugu yar ee Cabirka Heerka Degaanka (ERS) iyo Qiimeynta Habka Dhibcaha Fasalka (CLASS). Isbeddelka qaybinta dhibcaha Heerka Tayada wuxuu u ogolaan doonaa bixiyayaasha si ay u helaan 30ka dhibcood ee looga baahan yahay si ay u gaaraan Heerka 3 ee gaaritaanka xadka ugu hooseeya ERS iyo CLASS iyagoo aan isku qorin wax kale oo Heerarka Tayada. Kaqaybgalayaasha doonaya in ay ka sii shaqeeyaan *helitaanka dhibcaha heerka sare ah way sii wadi karaan fursad ay ku doortaan inay kaqaybqaataan Heerarka Tayada Early Achievers.*

Isbeddelladaan waxay fududeyn doonaan habka qiimaynta iyo hubsan doonaan in Heerarka Tayada Early Achievers ku xiran yihiin natiijooyinka wanaagsan ee ilmaha. Iyada oo ku salaynaysa natiijooyinka ansixinta waxbarasho ee Jaamacadda Washington, Waaxda Waxbarashada Hore (DEL) waxay baabinaysaaa saddex heer iyo hoos u dhigaysa dhibcaha labo heer iyo u wareejin doontaa dhibcahaas ERS. Taas macnaheedu waxa weeye inay bixiyayaasha awoodda saari karnaa labada tayo ee aasaaska ah: isdhexgalka dadka waaweyn iyo ilmaha oo lagu qiyaaso CLASS, iyo deegaankooda waxbarasho oo lagu qiyaasayo ERS. Laga bilaabo Julaay 16keeda, dhibcaha Heerka Tayada waxaa loo qaybin doonaa sida soo socota:

Heerarka Tayada	Dhibcaha Hadda	Bilaabmaya Julaay 16, 2017	Fikirka
Natiijooyinka Carruurta: Waayo-aragnimada maalin walba ee cunuga shaqsiga ee tayada – luqadda--LENA	1	Mar dambe lama qiyaasayo	Ma awoodi karno inaan ka sameeyno kiis xooggan natiijooyinka wanaagsan ee ilmaha.
Natiijooyinka Carruurta: Waayo-aragnimada maalin walba ee cunuga shaqsiga ah ee tayada - ka qayb ahaanta	1	Mar dambe lama qiyaasayo	Ma aanan awoodin inaanu ugu dambeyntii qiyaasno hawlgelinta ah in lala xiriiriyo natiijooyinka wanaagsan ilmaha.
Manhajka & Taageerada Shaqaalaha: Muuji Caddaynta Falsafadda Barnaamijka Manhajka	1	Mar dambe lama qiyaasayo	Heerkan waxaa soo jeediyay WAC. Waxaan baabi'inaynaa howlaha is daba yaaca ah.
Manhajka & Taageerada Shaqaalaha: Muujiyo iswaafajinta Tilmaamaha Waxbarashada Hore ee WA	2	Hoos loogu dhigay 1 dhibic	Waxaan soo gaabinay Qalabka Iswaafajinta Manhajka iyo waxaanu fududeynay siyaabaha lagu muujiyo caddeymaha si aan u habayno qiimaha.
Manhajka & Taageerada Shaqaalaha: Hogaamiyaha Shaqaalaha Barista ama Mulkiilaha FCC oo lagu Tababaray Falsafadda Manhajka	2	Hoos loogu dhigay 1 dhibic	Waxaan habaynaynaa dhibcaha si ay u muujiyaan raadka ay ku leeyihiin natiijada guud ee qiimeynta.
Qiyaasta Qiimeynta Bey'adda (ERS)	15	Kor loogu qaaday 20 dhibcood	Daraasada ansixinta Early Achievers waxay muujisay xiriir ka dhaxeeya ERS iyo natiijooyinka wanaagsan ee carruurta.

Early Achievers waxay ku taageertaa bixiyeyaasha sii socoshada safarka joogtada ah ee horumarinta tayada. Marka la qiimeeyo, kaqaybgalayaashu waxay la shaqayn doonaan tababarahooda si ay ku horumariyaan Qorshaha Hagaajinta Tayada (QIP). Kaqaybgalayaashu waxay dooran karaan inay ku daraan dhaqamo cusub iyagoo ku daraya heerarkaas QIP kooda, xitaa haddii qiimeyntu ay ka kooban tahay ERS iyo CLASS oo keliya.

Isbedeladan waxay sameyn doonaan nooca cusub oo Qalabka Isdhexgalka u Diyaargarowga Qiimeynta (IRRT) oo diyaar u ah bixiyayaasha si ay u isticmaalaan. Jiilalka 5 iyo 6 ee noocyadii hore ee IRRT sidoo kale waa la aqbali doonaa. Taasi macnaheedu waa in bixiyayaasha xog ururinta sameynaya inta u dhexeeysa Julaay 16, iyo 15 Nofember, 2017 ay isticmaali karaan labada noocba.

WASHINGTON EARLY ACHIEVERS
PREPARING CHILDREN FOR SUCCESS IN SCHOOL

Qalabka Soo Gaabin Iswaafajinta ayaa Hadda La Heli Kara

DEL iyo kooxda xog ururinta ee Jaamacadda Washington waxay ku faraxsan yihiin inay ku soo bandhigaan cusboonaysiinta Qalabka Iswaafajinta WaKIDS iyo Qalabka Iswaafajinta Manhajka. Noocyadaan cusub ayaa dardargelinaya in la fududeeyo howlaha Iswaafajinta iyo waxaa laga heli karaa bogga internetka DEL ee ah del.wa.gov/EarlyAchieversProviderResources.

Qalabka cusub ayaa la aqbali doonaa wixii ka biloowda Maarso 16, 2017. Xog ururiyaasha ayaa sii wadi doona inay aqbalaan noocii hore ee qalabka iswaafajinta ilaa iyo Julaay 1, 2017.

Kaqaybgalayaasha isku diyaarinaya cusboonaysiinta qiimeyntooda uma ay baahan doonaan inay soo buuxiyaan qalabka cusub ee iswaafajinta.

Cusboonaysiinta Bogga internetka Early Achievers

DEL waa ku faraxsan yahay in ay soo bandhigto bogagga cusub oo dib loo soo habeeyay oo ah Early Achievers

: www.del.wa.gov/earlyachievers. Bogaggu waxay leeyihiin aragti cusub oo la soo habeeyay iyo bixiyaan helitaanka:

- macluumaad dheeraad ah iyo agabyada qoysaska
- dhex maaxidda la soo hagaajiyay iyo u fudud inay helaan bixiyayaasha
- bog cusub ee agabka loogu talagalay xirfadlayaasha waxbarashada hore iyo kuwa caawiya

Cusboonaysiinta ayaa sidoo kale bixinaysa turjumaanida faahfaahsan ee qalabka bogga bixiyayaasha iyo bogagga oo dhan waxaa loo turjumi karaa luqado kala duwan iyadoo la isticmaalayo badhanka *turjumaadda Google* ee xagga sare ee bog kasta.

Fadlan kala xiriir sanduuqa emailka QRIS ee ah QRIS@del.wa.gov wixii su'aalo ah, ama wac 1-866-922-7629 telefoonka bilaashka.

Washington State Department of Early Learning